




NAGAAD PROJECT

MASHRUUCA HORUMARINTA MAGAALOOYINKA SOOMAALIYEED QORSHAHA FALKA DIB-UDEJINTA IYO DIIWAAN GELINTA EE DOWLADA HOOSE EE KISMAYAO

UPDATED RESETTLEMENT ACTION PLAN (RAP) FOR KISMAYO

- | | | |
|------------------|-----------------|----------------|
| 1) Jubaland road | 2) Afmadow road | 3) Halgan road |
| 4) Fiyaat road | 5) Golol road | |

MUNICIPALITY



Proposed prioritized roads map of 9.2 km

PREPARED BY: **HASSAN MOHAMED ABDI.**

Environmental and Social Safeguard Specialist.

MUNICIPALITY OF KISMAYO

UPDATED AUGUST 2023

HORU-DHAC KOOBAN (EXECUTIVE SUMMARY)

Mashruuca adkaysiga magaalooyin ka ee soomaaliya (oo losoo gaabiyay SURP II) waxa uu ku dhismaya asaas kii iyo xog aruurintii lagu diyaariyay (*feasibility study*) mashruuca qorshaynta maalgashiga magaalooyin ka soomaliya ee maalgalinta dheeriga ah (SUIPP-AF) oo uu maal galiyay sanduuqa iskaashatada badan(*multi-partner fund*) ee uu maamulo Banka Aduunka. Mashruuca qorshaynta maalgashiga magaalooyin ka Soomaaliya ee maalgalinta dheeraad ka ah (SUIPP- AF) waa balaarinta SUIPP oo horay looga hirgaliyay dawlada hoose ee Muqdisho, Garoowe iyo Hargaysa, taas oo maal galisay daraasadaha suurta gal ka ah iyo qaabaynta /naqshadaynta Ingineeriyada ayadoo markaasi mudnaanta lasiinayo maalgelinta magaalooyin ka Muqdisho, Garoowe, iyo Hargaysa.

Marka lagu daro qiimayn ta hay'adeed ee saddexdaan dawlada hoose iyo sidoo kale wasaarada hawlaha guud ee federaal ka iyo Hay,adda Maamulka biyaha ee Magaalada Hargaysa. Si wax looga qabto baahiyaha kaabayaasha wadooyin ka loona xoojiyo awoodaha dawlada hoose ee magaalooyin ka kismaayo iyo baydhabo, SUIPP- AF waxa ay maalgalisay daraasado ku saabsan suurtagalnimada iyo naqshadaynta Ingineeriyada oo loogu tala galay magaalooyinka Kismayo iyo Baydhowa ayadoo mudnaantana lasiinayo kaabayaasha dhaqaalaha sida wadooyinka, nalalka Cad-ceeda ku shaqeyya iyo qiimayn ta hay' adeed ee dawlada hoose ee magaalooyinkaasi.

SUIPP AF waxa ay sidoo kale lagu diyaariyay shaqaalaha waaxda fulinta mashruuca (PIUs) ee dawlada hoose ee Kismaayo iyo Baydhabo, si ay awood ugu yeeshaan socodsiinta hawlaha shaqo sida maamulka Maaliyadda, Deegaaanka, Kormeerka iyo Qiimeynta iyo guud ahaan maamulka mashruuca(*fiduciary and safeguards management, monitoring and evaluation as well as project management*) iyo sidoo kale dhimaha Xafiisyo ay ku shaqeyyaan shaqaalaha iyo Sheybaar qalabka dhimaha lagu baaro.

Magaalada Kismaayo, SUIPP- AF waxay maal galisay daraasadaha suurto galka ah iyo naqshadaha injineeriyada ilaa 31.1km oo ah 16 wado si loogu diyaar garoobo mashruuca SURP II ee soo socda kaas oo ah kaabayaasha wadooyin ka, maamul ka iyo mashruuc hormarineed oo loogu tala galay kor u qaadida helida/helitaan ka dadwaynaha ee kaabayaasha dhaqaalaha, tayeynta iyo horumarinta awooda dawlada hoose, xoojinta heerar ka kala duwan ee nidaamyada dawlada, iyo in loo abuuro shaqooyin iyo fursado ganacsi dadka deegaan ka. Dhaqaalaha oo yar awgeed kaliya sideed wado oo wadar ahaan

dheerarkeedu yahay 11.6 kiiloomitir iyo labo tuubo oo biyaha roobka ka saara ayaa la dhisi doonaa wajiga koowaad ee mashruucan (SURP II phase one) oo ka imanaysa 16 kii waddo ee markii hore lasoo jeediyay ee dheerarkeedu ahaa 31.1km. Sideedaan wado ayaa mudnaanta la siyaay ayadoo lagu salaynaayo muhiimada/faa,iidada ay u leedahay bulshada iyo dhaqaalaha sideeda wado ee kale oo soo hartay ayaa kadib diyaarin doona qalabka E & S ayadoo lagu salaynaayo helitaan ka dhaqaale kahor samaynta heshiisyada shaqooyin ka dawlada.

Qorshahani waxaa loo diyaariyey in lagu aqoonsado hantida dadkii uu saameeyay mashruuca oo ay wehliyaan wadooyin kii lasoo jeediyay, wax ka qabashada saamaynta bulshada iyo dhaqaalaha ee ka dhalan karta iyo sidookale dajinta qorshe si heshiis loola gaaro PAPs ka hor inta aan shaqada dhismaha bilaaban. Dadwaynaha ayaa sidookale la ogaysiiyay/lagu wargaliyay tirakoob ka ayadoo loo sii marinayo idaacadaha FM yada deegaan ka ee magalada Kismaayo. Tirakoob ka hantida PAPs ee mashruuca wadooyin ka wuxuu bilowday 20 ki bishii oktoobar 2019 wuxuuna dhamaaday 01 dii bishii diseembar 2019. Waqtiga oo kala duwan awgeed dhamays tirka naqshadayn ta tuubooyin ka biyo saareen ka ah, tirakoob ka PAPs ee tuubooyin ka biyo saareen ka ah wuxuu dhacay/qabsoomay 10 ki bishii agoosto 2020 ilaa iyo 12 ki bishii agoosto 2020. Dadwaynaha waxala ogaysiiyay/lagu wargaliyay in qofkasta oo ku xadgudba RoW ee mashruucii lasoo jeediyay waqtiga kama dambaysta kadib inuusan xaq u yeelan doonin magdhaw ama caawimaad. Kahor inta aan la dooran/ la xulan mashruuca lasoo jeediyay ee dhismaha, waxaa lala tashaday dadwaynaha iyo daneeyayaasha danaynaya talooyin kooda iyo codsigoodana waa loo tixgaliyay. Waxa la sameeyay daraasado ku saabsan suurta galnimada halkaas oo dadaal xoog leh/muhiim ah laga sameeyay xulida/ dorashada wadooyin ka iyo biyo saareen ka iyo naqshadaynta taas oo yaraynaysa saamaynta bulshada iyo deegaan ka.

Si kastaba ha ahaatee, waxa jira dhismayaal joogto ah iyo kuwo ku meel gaar ah oo qayb looga xad gudbay dhinaca midig tasoo u baahan in laga saaro ama gadaal loo riixo midaas oo sababi doonta hakad ku yimaada hantida PAPs iyo maciishadoda. Si kastaba ha ahaatee, guud ahaan faa'iidooyin ka bulshada, dhaqaalaha iyo deegaan ka ee dhisida sideeda wado ee waa wayn ee magaalada Kismaayo ayaa aad uga wayn saamaynta ugu yar ee aan saxda ahayn ee mashruuca ku yeelan karto, hadii saamaynta taas oo kale si sax ah loo yareeyo ayadoo loo adeegsanayo diyaar garow iyo hirgalin ta qalab ka deegaan ka iyo bulshada.

U qalmitaanka magdhawga PAPs ayaa la sameeyay ayadoo laga duulayo sharuudaha SURP II RPF and WB ESS5. Aad ayaa looga taxadaray markii la samaynayay qiimaynta hantida. Qiimaynta hantida, ee PAPs iyo GRC oo uu lasocdo dilaal madax banaan ayaa lala tashaday si loogu qiimeeyo hantida qiimaha suuqa ee hada ayadoo la tixgalinaayo isku celcelis ka qiyaastooda. Qiimaynta dhismayaasha saamyntu soo gaartay ayaa la qabtay/sameeyay ayadoo garab laga helayo waaxda hirgalin ta mashruuca PIU.

Mashruuca wadooyin ka, waxaa jira lixdan dhismayaal oo sandaqado kumeel gaara ah oo ay saamayn doonto dibna loo dhisi doono iyo waliba 27 kale oo dhismayaal isku jira ah oo ay sidookale saamayn doonto una baahan doona baxnaanin, dib u dejin, iyo dib u dhisid. Dhismayaashaan waxa ay yihiin haamaha qashin ka, ceelal, barandooyin iyo darbiyo/dayr dheer dheer. Tuubooyinka biyo sareen ka ah, waxaa jira 5 aanan rasmi ahyn oo inta badan laga sameeyay guryo jiiingado ah tasoo saamayn doonta wadooyin ka dhuumaha daadka qaada. Magdhow ga khasaarahaas iyo kaalmada maciishada ayaa lagu qiimeeyay doolar ahaan lacag dhan, 32486.35. (sodon iyo labo kun afar boqol iyo sideetan iyo lix doolar iyo sodon iyo shan santi.

Wadatashiga/ latashiga dadwaynaha wuxuu ahaa qayb muhiim ah ilaa iyo wajigii hore ee mashruucaan halkaas oo lagala tashaday kooxaha bulshada, dawlada, ururada aan dawliga ahayn, barakacayaasha, dadka soo laabtay iyo qaybaha kale ee danaynaaya diyaarinta qalabka ilaalinta oo ay kamid yihiin RAP ayadoo aragtidoodana loo tixgalinaayo. Cabashooyin ayaa soo bixi kara inta lagu guda jiro diyaarinta iyo hirgalinta mashruuca. Guddiga sixida cabashooyin ka ayaa waxa aas aasay KM. GRC waxay hubisaa/ xaqiijisaa in wax laga qabto oo si dhakhso ahna la xalliyo cabashooyin ka la xariira SURP II. M& E ayaa loo baahnaa si loo kormeero hirgalin ta RAP.